



Xuquuqda aad u leedahay sidii si sinaan iyo cadaalad ah laguula dhaqmi lahaa

Your Right to be treated Fairly and Equally

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in si sinaan iyo cadaalad ah loola dhaqmo. Fiktooriya waxa jira sharcigu kaa ilaalinaya takoorida, Handadaada faraxumaynta, midab kala sooca iyo meel uga dhacida diimaha.

Takoorida (Discrimination)

Takooridu waa ula dhaqanka qof si aan cadaalad ahayn ama si xun astaamaha qofnimadiisa awgeed. Sharcigu ma ogola in lagu takooro qof sida:

- da'da
- naas nuujinta
- martbada daryeelaha
- iinta
- kala mudnaysiinta labka iyo dhediga
- hawl qabadyada warshadaha
- isu galmoodka sharciiyeysan
- martabada guurka
- martabada waalidka
- abuurta jirka qofka
- hawlaha siyaasada ama qofku wuxuu rumaysanyahay
- uurka
- midabka
- diinta uu rumaysanyahay iyo hawlihiisa
- lab iyo dhedignimadiisa
- nooca galmadiisa
- xiriirka qofnimo ee qof kasta oo leh astaamaha aan kor ku soo sheegnay

Fara xumaynta

Handadaada faraxumaynta waxay ka soo hor jeedaa sharciga. Handadaada faraxumaynta waxa ka mid ah, taabasho aan laga raali ahayn, waydiisasho galma aan raali laga ahayn ama faalo ka bixinta jirkaaga ama ka sheekaynta iyo kaftanka ku saabsan falal galmoo oo fool xun.

Xageebay ka dhacaan Takoorida iyo faraxumayntu?

Sharcigu wuxuu khuseeyaa hab dhaqanka dadweynaha ee ma khuseeyo hab dhaqanka gaarnimo. Taas macnahedu waxa weeye in handadaada iyo Takooridu ay sharciga ka soo horjeedo marka ay ka dhacdo goobaha shaqada, guryaha, Makhaayadaha ama kilaabyada, goobaha waxbarashada, adeegyada iyo badeecadaha, ciyaaraha iyo iibka ama kala wareejinta dhulka.

Midabka iyo meel uga dhacida diinta

TMidabka iyo meel uga dhacida diintu waxay ka soo horjeedaa sharciga. Meelkadhaca midabka iyo diintu wuxuu noqon karaa meel ka dhac hadal ama jir, hanjabaad, iyo u muujinta nacayb iyo wajidadab xun qof ama koox diintiisa ama midabkiisa awgeed.

Dhinacayga

Gudiga u sinaanta fursadaha ee Fiktooriya (The Equal Opportunity Commission Victoria) waxay ka caawisaa dadka xalilaada cabashooyinka Takoorida, faraxumaynta iyo meelka dhaca diinta iyadoo la bixinayo adeegyo xal ah oo:

- ✓ qarsoodiya
- ✓ sinaan ah
- ✓ lacag la'aan ah
- ✓ fudud

Gudoonku ma aha taraybuunal ama maxkamad. Waxaanu ka caawinaa dadka xalinta cabashooyinka oo ah heshiis lab dhinaca. Xukun kuma soo oogno, xukuna kuma ridno labada dhinac midnaba, wax magdhow ahna ma siino.

Samaynta cabashooyinka

Haddii aad rumaysantahay in lagu takooray, faro xumayn iyo meel ka dhac lagu geystay, waxaad u soo caban kartaa gudoonka.

Tiilifooni Gudoonka wediisana turjubaan lacag la'aan ah haddii aad u baahantahay. Waxay shaqaalahayagu kaa caawin doonaan diyaarinta cabashada waxa kale oo ay la hadli doonaan dadka kale ee ku shuqul leh cabashada. Cidnaba isma xigsiino cabshadna waxaanu ka dhignaa mid qarsoodiya.

Sharcigu ma ogola in qofna si cadaalad daro ah loola dhaqmo ama loogu hanjabo in cabasho loo gudbin doono gudoonka.

Xalinta cabashada

Waxa jira dariiqooyin kala duwan oo cabashooyinka loo xalilo. Shaqaalahayaga ayaa kuu sharxi doona habka kala duwan, oo ujeedadu tahay xalka ugu fiican ee suurta gal ah ee la gaari karo.

Uma baahnid qareen ama af hayeen cabashadaada u gudbiya gudoonka lakiin dadka qaarbaa ku kalsoon in ay la yimaadaan qareen, af ahayeen ama qof kaalmeeya.

Khadka Talada (03) 9281 7100

LACAG LA'AAN (wacayaasha dibada)

1800 134 142

TTY: (03) 9281 7110

Email: complaints@veohrc.vic.gov.au

Turjubaana lacag la'aana ayaa codsi lagu helli karaa.

AFEEF: macluumaadkan waxaa looga jeedaa inuu ahaado tuse keliya. Maaha wax bedelaya adeega sharciga.

BARAYFASIGAAGA: VEO&HRC waxay raacaan qaanuunka barayfasiga Fiktooriya iyo shuruudaha waxyaallaha sirta ah ee Xeerka U-sinaanta Fursadaha ee 1995. Nadaamkayaga waxaa laga helli karaa online-ka www.humanrightscscommission.vic.gov.au/privacy adigoo la xiriiraya Guddiga. Waxaa ansixiyey Guddiga Xuquuqda Aadanaha iyo U-sinaanta Fursadaha, 3/380 Lonsdale St, Melbourne, Victoria, 3000

April 2007

simply your rights